

Fri for Mobberi

Maagis la'aan – Tusaalooyinka waalidka

Mudanayaal iyo marwooyin waalid

Wargelinta waalidka ee gacantaada ku jirtaa waxay qayb ka tahay borogaraamka "Maagis La'aan / Fri for Mobberi" ee ururka Red Barnet iyo sanduuqa Mary Fondens. Ujeedada borogaraamku waa in laga hortago maagista iyo in la abuurto iskaashi togan oo ubadka dhex mara. Maagis la'aan wuxuu ku dhisan yahay asaasiyan afar qiyam oo dadnimeed: isu dulqaadasho, is maamuus, is gargaar iyo is dhiirrigelin. Borogaraamka lidka maagistu wuxuu ka kooban yahay shandad ay ku jiraan qalabbo kala duwan iyo qaabab la xidhiidha sidii looga hortegi lahaa maagista ka dhacda xannaanooyinka, fasallada xannaanooyinka ilaa fasalka 2.aad.

Saddex kooxood ay tahay inay iskaashadaan

Maagis la'aan wuxuu ku jihaysan yahay saddex kooxood: carruurta, waalidka iyo shaqaalaha xirfadda leh. Si looga hortago maagista waxaa lama huraan ah, in saddexdaas kooxood ka wada shaqeeyaan sidii loo abuuri lahaa iskaashi wanaagsan oo carruurta dhex mara, kaasoo ku salaysan dhaqan, cid waliba meel ku leedahay. Haddaa waalidka tihiin shaqadiinnu waa in la taageero carruurta oo la horumariyo jalenimada iyo saaxiibtinimada, dadaalkiinnuna waa lagama maarmaan.

1. **Ilmahaaga ku garabgal siduu kooxaha kala duwan ee carruurta u la ciyaari lahaa – hadday tahay xannaanada, dugsiga iyo xilliga firaaqada.**

Ilmahaagu wax buu ka baranayaa inuu la ciyaaro carruur badan oo kala duwan. Sidaas awgeed waa inaad hubiso, in carruurta oo dhammi wada ciyaaraan – oo weliba is wada kaashadaan.

2. **Wax xun ha ka sheegin carruurta kale ee xannaanada iyo fasalka – iyo waalidkood.**

Erayada taban ee laga sheego saaxiibada ilmahaagu waxay si fudud u canbaaraynayaan carruur gaar ah. Ku dhiirrigeli in ilmahaagu noqdo mid togan oo cid walba u furfuran. Ma garanaysaa magacyada dhammaan jalayaashiisa dugsiga? Ma wada "salaantaa" carruurta, markaad ilmaha gaynayso ama ka soo kaxaynayso dugsiga?

3. **Abaabul siyaasad bulsheed oo la xidhiidha dhalashooyinka.**

Dhalashadu wax wayn ayay ugu fadhidaa carruurta, hadduu yahay ilmaha dhalashada leh iyo kuwa martida ahba. Wuu ka "xumaadaa" ilmihii laga reebo casuumadda. Waanu ka xumaadaa ilmahii waaya marti u timaadda. Kulanka xiga ee waalidka kaga hadla siyaasadda bulsheed ee la xidhiidha dhalashooyinka.

4. **Ku dhiirrigeli ilmahaagu inuu taageero oo difaaco jalayaasha aan is daafici karin.**

Carruurta, debedda ka jooga kooxaha carruurta, waxay u baahan yihiin gacanqabasho iyo inay saaxiibbo wanaagsani ku soo dhex daraan carruurta. Carruur ku fiican inay caawiyaan, daryeelaan oo difaacan kuwa kale, "waayeeloba" gudo – iyo debedba!

5. **Noqo mid togan oo furfuran marka waalid kale ka hadlayo dhibaatooyin haysta carruurtooda.**

waa nuglaansho wayn in kulanka waalidka qof ka sheego, in ilmihiiisu aanu ku faraxsanayn xannaanada ama dugsiga oo uu u baahan yahay carruur uu la ciyaaro. Waxaa nefis gelinaya, haddii waalidiinta kale u dhegraariyaan una furfurnaadaan.